

# Warqadda Qorista Dugsiga

**Waalidiinta/cid kasta oo ka mas,uul ah ardayga waa inay la yimaadaan aqoonsi sawir leh(state ID) marka ilmaha la qorayo dugsiga.**

Documentiga hoos ku muujisan ayaa looga baahan yahay canug kasta, si looga diiwaan-geliyo dugsiyada hoos taga deegaankan ee waaxda waxbarashada koofur-galbeed ee magaladan:

1. Warqadda dhalashada asalka ah ( ama ) shahadada Isbitaalka oo asal ah, ( ama ) shahaado diimeed.
2. Caddeyn inaad degan tahay degaankan dugsiyada koofur-galbeed: warqadda kirada guriga, warqadda lahaansha dhul, labo warqad biilka adeegga guriga ( nalka,gaaska ama telefoonka ) oo ku qoran magaca waalidka ama mas'uulka ardeyga.
3. Haddii ay jirto is-furid ama mas'uuliyadda ilmaha la bedalay, waa in la keenaa warqad uu ku saxiixan yahay Qaadi ama garsoore mujineysa in lagu hibeeyey mas'uuliyadda, waalidka ama mas'uulka ku diiwaan-gelinaya ardeyga dugsiga.
4. Haddii ay tahay markii ugu horeysey ee ardeyga dugsi aad ka diiwaan-geliso ama ka soo bedeshay dugsi ka baxsan gobolkan Ohaayo, waa inaad la timaadaa caddeynta talaalada.

**Haddii aad ka timid waddan kale oo diiwaan-gelineyso ilmaha dugsi Mareykan markii ugu horreysey, waa inaad keentaa caddeynta talaalka Tii Biida ( TB ) oo neegatiiba ah.**

Warbixin dheraad ah ama faah-faahin dheeraad ah, fadlan booqo bogga shabakadda [www.swcs.us](http://www.swcs.us) ama wac telefoonka 614 801-8985.